

Warqadda Warbixiinta
Manitoba

ee Macluumaadka Waalidiinta

F A S A L A D A 1 I L A A 8



Waxbarashada
Manitoba (Manitoba Education) waxay soo saartey warqadda warbixinta ee heer gobol oo qasab ku ah dhamaan qeybaha iskuulada in ay bilaabaan inay isticmaalaan sanad dugsiyeedka 2013/2014.



Dokumentigan dhexdiisa, kalmada waalidiinta ee dokumentigan aynu ku isticmaalney waxaan ula jeednaa waalidiinta ama mas'uuliyinta.

Guud ahaan

Maxay tahay sababta loo someeyey warqadda warbixinta cusub (report card)?

Dowladda Manitoba waxay soo bandhigtey warqadda warbixin ee cusub sii loo wanaajijo tayada waxarashada ee gobolka Manitoba lana dhiso wadaqabsi adag oo u dhaxeeya ardayda, macalimiinta iyo waalidiintaba.

Waqtigii hore, warqadda warbixinta waxay ahaan jireen kuwo kala duwan ee qeyb kasta oo iskuulka ka mid ah oo, xitaa mar marka qaarkood, iskuulo isku qeyb ama nidaam ah ayaa sidaa ahaa. Warqadda warbixinta gobolka ee cusub waxay hubin doontaa in waalidiinta ay helaan macluumad joogto ah, oo cad ee ku saabsan sida wanaagsan ee caruurtooda ay wax u barranayaan, waxa ay tahay tallaabada ka caawin doona in ay waxbarashadooda wanaajyaan iyo waxa ay ka qaban karaan sidii ay u caawin la'haayeen.

Ma noqon doontaa warqadda warbixinta mid sahlan oo la fahmi kara?

Warqadda warbixinta waxaa laga soo qorey luqad sahlan. Waxay kuu sheegi doontaa waxyaabaha ku saabsan kartida canugaaga iyo halka canugaaga kaalmo uga baahan yahay. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan warqadda warbixinta, canugaaga macalinkiisa ayaad kala hadli kartaa.

Ma tahay warqadda warbixinta mid isku wada mid ah dhamaan heerarka fasalada oo dhan?

Waxaa jira seddex noocyoo oo warqadda warbixinta ah: mid waa Fasalada 1 ilaa 6, midna waa Fasalada 7 iyo 8 iyo midna waa Fasalada 9 ilaa 12.

Warqadda warbixinta ma lagu soo qori doonaa faallooyinka macalinta?

Haa. Macalimiinta waxay soo qori doonaa faallooyinkooda ku saabsan isluuba iyo howsha canugaada. Faallooyinka waxay kaa gargaari doonaa inaad fahamto sida canugaada uu yahay iyo sida loo caawin la'haa waxbarashada canugaada.

Sidee ayaa loo qiimeeyaa wiilkeyga?

Fasalada horrumarinta akadeemiyadda (academic achievement) waxay muujisaa sida ugu wanaagsan ardayda uga guul gaaro manhajka ahdaafta waxbarasho. Tani ayaa waxaa loogu yeeraa buundada cabirkalagu tilmaansado. Fasalada horrumarinta akadeemiyadda ma ahan kuwa ku saleysan sida canugaaga wax u qabto ee loo barbardhigo ardayda kale. Waxyaabaha dhaliya sida asluub, dadaal iyo dabeeecad si gooni aha ayaa looga warbixiyaa horrumarinta akadeemiyadda. Inkastoo la isla fahamsan yahay in waxyaabahan dhaliya ay saameyn ku yeelato horrumarinta akadeemiyadda oo sidaas darteed buundooyinka, iyada oo si gooni ah loo warbixyo waxay waalidiintu u fidisaa macluumad dheeraad ah oo ku saabsan kartida canugooda iyo meelaha ardayda wanaajin uga baahan yahay.

Macalimiintu waxay ardayda u fidiyan siyaab dhowr ah oo ay xirfaddahooda ku tusayaan iyo fahamkoda la xiriira maadada. Guud ahaan horrumarka buundooyinka waxay tilmaantaa canugaaga horrumarkiisa akadeemiyadda joogtada ah iyo kan ugu dambeeyey. Tusaale ahaan, tani waxay micnaheedu tahay in boondo hooseysa ee uu ku keenay imtixaan hore tiiramka kaasi lama fiirinayo goorta la doonayo in la ogaado buundada canugaaga ee dhamaadka teeramka haddii isaga ama iyada imtixaankaas ka dib ay buundadooda muujineysey mid ka sii wanaagsanaaneysa oo fahamkooda ama xirfaddahooda ay sii wanaagsanaanayaan.

Miyuu canugeyga ku "dhici" (celin) karaa fasalka?

Haa. Go'aanka ah in ardayda lagu sii haynayo ama la barmoosinayo waa mid lagu saleeyo qiimeyn taxadir leh oo looga eeggo, kuwaas oo ay ku jiraan waxyaabo kale, caddeymaha ardayga horumarkiisa iyo kobaciisa. Go'aanka barmoositaanka waxaa gaara maamulaha iskuulka, kaasoo la tashi la sameeya macalimiinta, waalidiinta iyo khabbiirada gaarka ah sida markaa ku haboon. Go'aanka ku reebista ama barmoosinta ardayda waxay mar kasta la eegaa danaha ugu wanaagsan ee ardayga.

Goormee ayaa warqadda warbixinta guriga loo soo dirayaa?

Warqaddaha Warbixinta waxaa guriga loo soo diraa xiliga dayrtaa, xiling gu'a iyo dhammaadka sanad dugsiyeedka.

Waqtiyadaha kale macalimiinta ma ka heli doonaa macluumaad?

Haa. Warqadda warbixinta waa hal siyaabo oo kaliya oo waalidiinta lagula xiriiro. Siyaabaha kale waxaa ka mid ah in la isku diro telfoon, emailka, warqadda warbixinta oo aan rasmi ahayn, kulamada macalimiinta iyo waalidiinta, kulamada ardaygu qabto iyo jaraa'idka iskuulka.

Moxaan sameyn karaa haddii aan ka welwelayo canugeyga waxqabakiisa iskuulka?

Kala hadal canugaaga macalinkiisa/eeda. Way kaa caawin doontaa haddii aad horey u qorato meelaha canugaaga dhibka ka haysto. Maclinka weydii sida aad u wada shaqeyn kartaan si canugaaga looga caawiyo inuu guuleysto.

Barnaamijka Ardayga

Barnaamijka ardaygaaga waxaa loola jeedaa in haddii iyada ama isaga uu la socdo manhajka heerka fasal, ama barnaamijyo kale ee loogu talogalay gaar ahaan sida si wanaagsan loo wajaho baahidiisa/eeda waxbarasho.

Haddii ay dhacdo in canugaaga uusan la socon manhajka heerka fasal ee maado, warqadda warbixinta waxay tilmaami doontaa in seddexdan nooc ee barnaamij ee soo socda lagu dabaqsi doono.

1. Barnaamijka Qorshaha Waxbarashada Shaqsyaadka (IEP)

“IEP” waxaa loola jeedaa qorshaha waxbarashada shaqsyaadka. Ardayga oo aan laga fileyn inuu ka soo baxo ahdaafka barasho ee heerka fasal ee maado waxaa loo sameyn doonaa qorshaha waxbarashada shaqsyaadka oo tilmaamaya ahdaafka barasho ee shaqsi. Fasalada uu helo ardaygaan waxay ku qoran naan doonaan warqadda warbixinta waxayna muujinaysaa ahdaafka barasho ee ku haboon ardaygaasi, oo ahdaaftan waxaa si cad loogu qeexey qorshahaas ardayga.

Tilaamaha “IEP” ayaa waxaa sidoo kale dhici karta in loo isticmaalo in ardayga uu ka shaqeeynooyo heer aad uga baxsan fasalkiisa ee qeybta maadada, oo IEP tani ayaa loo sameeyey. Sida kor, fasalada ardayga ugu qoran warqadda warbixinta waxay muujineysaa ahdaafka barasho ee ardayga sida lagu sharraxey qorshahan.

2. Barnaamijka Ingiriis Luqad Dheeraad ah (EAL)

“EAL” waxaa loola jeedaa Ingiriis sida barnaamij luqad dheeraad ah. Ardayga ku jira heerka koowaad ee barashada Ingiriiska sida luqad dheeraad ah waxay ahmiyadda saarayaan barashada Ingiriiska ee maadooyinkaas. Fasalada ardaygaas uu helayo waxay ku qoran tahay warqadda warbixinta kaasoo ku saleysan miisaaniyadda luqadda iyo hadafyada waxbarsaho ee maadooyinka ku haboon heerka luqad ee ardaygaas.

3. Barnaamijka L

“L” waxay loola jeedada barnaamijka aqriska iyo qorista French, oo waxa kaliya ay ku quseysaa baarnaamika *Français*. Ardayga u baahan taageero dheeraad ah si loo kobciyo xirfaddaha luqadda Faransiiska ee loo baahan yahay in ay si guul ah u raacaan manhajka gobolka ayaa waxay ahmiyadda ay saari karaan barashada French ee macnaha guud ee qeybta maadadaas. Fasalada ardaygaas uu helayo waxay ku qoran tahay warqadda warbixinta kaasoo ku saleysan miisaaniyadda luqadda iyo hadafyada waxbarsaho ee maadooyinka ku haboon heerka luqad ee ardaygaas.

Tusaalaha ku qoran warqadda warbixinta hoose ee Fasalka 1 ilaa 6, waxad ka arki kartaa halka barnaamijka oo “x.” lagu qorey. Haddii aannan waxba lagu soo qorin, markaa canugaaga wuxuu la socdaa ahdaafka barasho ee manhajka heerka fasal. Waxaa ku jira meelaha canunugaaga uu ku qabo adel.

Mathematics		Teacher:		
<input type="checkbox"/> EAL	<input checked="" type="checkbox"/> IEP	Knowledge and understanding	Term 1	Term 2
		Mental math and estimation		
		Problem solving		
Comments:				
Barnaamijyada ayaa halkan lagu tusayaa.				



Kalmada badel
ayaa loola jeedaa
badel lagu
sameeyey hanaanka
waxbarasho, walxo,
imtixaano ama
walxaha ardayga
loogu talogaley
inay ardayga ka
caawiso si uu ku
gaaro natijooyinka
waxbarasho ee loo
laga filayey.

Horrumarinta Akadeemiyadda ee gobolka u filayo

Fasalada 1 ilaa 6

- Fasalada 1 ilaa 6, cabirka fasalka soo socda laga bilaabo 1 ilaa 4 ee loo isticmalay warqadda warbixinta waa in lagugu tuso horrumarinta akadeemiyadda ee qeyb maado kasta (hoos ku sharraxan) ee maado kasta.

Grade Scale	Academic Achievement of Provincial Expectations	
4	Very good to excellent understanding and application of concepts and skills	
3	Good understanding and application of concepts and skills	
2	Basic understanding and application of concepts and skills	
1	Limited understanding and application of concepts and skills; see teacher comments	
ND	Does Not yet Demonstrate the required understanding and application of concepts and skills; see teacher comments	
Additional Codes	NA	Not Applicable
	IN	Incomplete: not enough evidence available to determine a grade at this time

One of the following codes is used if the expectations for a student are different from the grade-level curriculum in a subject.	
EAL (English as an Additional Language)	Achievement is based on expectations that focus on English language learning.
IEP (Individual Education Plan)	Achievement is based on expectations that reflect special learning needs.

- Hoos waxaa ku qoran tusaale ka yimid Fasalka 1 ilaa 6 ee warqadda warbixinta ee cabirka fasalkan ee arday qaata xisaabta kuna jira barnaamijka EAL ee Teeramkii 2. Ogsoonow in qeyb kasta oo maado wuxuu helayaan cabir fasal oo u gooni ah.

Mathematics	Teacher:				
	<input checked="" type="checkbox"/> EAL	<input type="checkbox"/> IEP	Term 1	Term 2	Final
		Knowledge and understanding	3	2	
		Mental math and estimation	2	3	
		Problem solving	3	3	
Comments:	Barnaamijka	Qeybta Maadada	Teeramka Socda		

Qeybta maadada

- Qeybaha maadada waa meelaha aqonta iyo xirfadd ee maado kasta ee uu canugaaga hadda iskuulka ka qaato. Waxay ku siinayaan faham wanaagsan ee la xiriira waxbarashada canugaaga. Qeybaha maadada waxay kaa caawinaysaa in waalidku ay ku cadeyso "waxa" ardaygu uu baranayo. Waxaa loogu talogaley in ay qeyb ka noqdaan barrista, barashada iyo qiimeyn ta dhamaan meelaha maadooyinka, oo kaliya ma ahan marka la isbarayo mowduucyo gaar.



Horrumarinta Akadeemiyadda ee gobolka u filayo

Fasalada 7 ilaa 8

Fasalada 7 ilaa 8, marka lagu sii daro *cabirka fasalka laga bilaabo 1 ilaa 4*, waxaa la isticmaalay cabir boqolkiba si lagu helo gebi ahaan maadada fasalka. Tani loogu danleeyahay inay dad ka caawiso u wareeggida warqadda warbixinta ee dugsiga sare halkaasoo gebi ahaanba fasalka maadada la isa siyo maado kasta, iyada oo la isticmaalayo cabir boqolkiba, si loo soo kobo horrumarka ardyga sida ardayda u kasbadaan buundooyinka ay ku qallii jebin la'haayeen. Shaxankan soo socda wuxuu ku tusayaa sida cabirada laba fasal midkiiba midka kale la xiriiro.

Academic Achievement of Provincial Expectations	
Grade Scale	Descriptor
4 80% to 100%	Very good to excellent understanding and application of concepts and skills
3 70% to 79%	Good understanding and application of concepts and skills
2 60% to 69%	Basic understanding and application of concepts and skills
1 50% to 59%	Limited understanding and application of concepts and skills; see teacher comments
ND Less than 50%	Does Not yet Demonstrate the required understanding and application of concepts and skills; see teacher comments



Tusaalahaa soo socda laga bilaabo Fasalka 7 ilaa 8 ee warqadda warbixinta waxay muujisaa arday maadada sayniska u qaata barnaamij manhaj heer fasal caadi ah ee Teeramkii 2, iyo qeybaha maadooyinka seddexda ah ee maadadaasi. Sidoo kale waxay muujinaysaa dabeeecaddaha waxbarasho ee seddexda, kuwaasoo si faahfaahsan hoos loogu qeexey.

Science				Teacher:			
<input type="checkbox"/> EAL		<input type="checkbox"/> IEP		<input type="checkbox"/> IEP			
Academic Achievement	Term 1	Term 2	Final	Learning Behaviours	Term 1	Term 2	Term 3
Knowledge and understanding	3	2		Personal management skills	U	U	
Scientific inquiry process	3	3		Active participation in learning	C	U	
Design process and problem solving	4	4		Social responsibility	S	C	
Overall grade	78%	70%	%				
Comments:							
Kuwan waa qeybaha maadada	Kuwan waa dabeeecaddaha barashada						


Dabeeecaddaha barashada

Horrumarinta akadeemiyadda ee la soo gudbiyo waxaa raacsan, warqadda warbixinta ee muujisa dadaalka iyo asluubta canugaaga ee fasalka dhexdiisa, kaasoo lagu soo qoro hoosta "Dabeeecaddaha Barashada," sida ka muuqata oo lagu sharaxay tusaalooyinka bogga hore iyo kan hoose.

Fasalk 1 ilaa 6, dabeeecaddaha barashada mar ayaa lagu soo qoraa warqadda warbixinta canugaaga (maadooyinka oo dhan). Fasalka 7 iyo 8, waxaa lagu soo qoraa maado kasta ee canugaaga uu qaato. IEP waxaa lagu soo qoraa haddii canugaaga uu leeyahay qorshaha waxbarashada shaqsiyaadka oo weheliya himilooyinka la xiriira dabeeecaddaha barashada.

Learning Behaviours	
Scale	
C: Consistently – almost all or all of the time	
U: Usually – more than half of the time	
S: Sometimes – less than half of the time	
R: Rarely – almost never or never	
Personal management skills	Uses class time effectively; works independently; completes homework and assignments on time
Active participation in learning	Participates in class activities; self assesses; sets learning goals
Social responsibility	Works well with others; resolves conflicts appropriately; respects self, others and the environment; contributes in a positive way to communities

Ardayda ku jirta barnaamijka Dhiegalka luqadda Faransiiska, waxaa sidoo kale jira dabeeecado waxbarasho oo ku saabsan kaalin ka qaadashada ardayga ee isticmaalka luqadda Faransiiska.



Dabeeecaddaha barashada si toos ah looma soo raaciyo fasalka ardayga, balse waxay saameyn ku yeelan kartaa horrumarkooda akadeemiyadd. Horrumarka dabeeecad waxbarasho oo wanaagsan waxay ardayga u dhalin kartaa mustaqbal guul leh inta ay ku sii jiraan noloshooda iyo iskuulka dibaddiisa. Haddii ardayga uu si madax-banaan u shaqeey, hal-abuur yeesho oo uu texgeliyo fasalka qiiimeeyo, xirfaddahan waxaa uu la tagi karaa qeybo kale oo ka mid ah noloshooda.

Macluumaad dheeraad

Booqo bogga Waxbarashada Manitoba macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan

- waxa uu ubadkaaga ka barto **maadooyinka kala duwan:**
www.edu.gov.mb.ca/k12/cur/parents/ (Barnaamijka Ingiriiska)
www.edu.gov.mb.ca/k12/cur/parents/fr_imm/ (Barnaamijka French Immersion Program)
www.edu.gov.mb.ca/m12/progetu/parents/ (Barnaamijka Français Program)
- sharchiya iyo xeerarka **qiimeynta ardaya:**
www.edu.gov.mb.ca/k12/assess/
- warqaddeeda warbixiinta:**
www.edu.gov.mb.ca/k12/assess/report_cards/index.html

Faaladada waan soo dhoweyneynaa

Haddii aad tahay waalid ama mas'uul, barre, ardayga ama xubin jaaliyadda ka mid ah oo daneeya iyo kaleba, jawaab-celintaada la xiriira warqadda warbixinta cusub waa inoo muhiim. Gebi ahaan, miyaad u aragtaa warqadda warbixinta in ay tahay mid cad oo la fahmi kara oo macluumaad sida? Ma jirtaa qeybo ka mid ah warqadda warbixinta oo aad weli isleedahay waxbaa laga bedelli karaa oo waala hagaajin karaa?

Haddii aad dooneysid in aad talo ka bixiso, fadlan email-ahaan kula xiriir cinwaanka hoose ama booqo bogga internetka ee ku qoran oo buuxi foomka jawaabcelinta soona gudbi.

Jawaabcelinta boosto ku so dir	Jawaabcelinta online-ahaan ku so dir
Provincial Report Card Feedback Manitoba Education 1567 Dublin Avenue Winnipeg MB R3E 3J5	www.edu.gov.mb.ca/k12/assess/report_cards/feedback.html